



## Habka Dib-u-Ansaxinta Sanadlaha ah Waa uu Bilaaban Doonaa Dhawaan!

### Waa waqtigii la isku diyaarin lahaa dib-u-ansaxinta sanadlaha ah ee kaalmadaada daryeelka ilmaha!

Dhamaan qoysaska barnaamijka kaalmada waa INAY dib u ansixiyaan si ay uga sii qayb qaataan. Codsiga dib-u-ansaxinta iyo dhammaan agabyada loo baahan yahay waa in la soo gudbiyaa ugu dambayn September 16, 2024. Kaalmada Best Starts for Kids waxay dabooli doontaa daryeelka ilmaha ilaa dhammaadka bisha ansixintaada. Qoysas badan, muddadan waxay ku eg tahay October 31, 2024, halka qoysas kale, ay sii socoto ilaa November 30, 2024.

*Fiiro gaar ah u yeelo faahfaahinta dheeraadka ah oo hubi inaad calaamadsato jadwalkaaga!*

### Taariikhaha Muhiimka ah

#### AGOOSTO 2024

Codsiga Dib-u-Ansaxinta Waa uu Furan Yahay

#### 16 SEPTEMBER 2024

Waa Muddada Ugu Dambeeya ee Soo Gudbinta Codsiyada Buuxda

### Shuruudaha

Bilaab inaad soo ururis dukumentiyada soo socda:

- Qoysaska badankooda: Warqadda Diidmada ee Working Connections Child Care (WCCC)
- Caddeynta Deganaanshaha (faahfaahin dhowaan soo socota)
- Dukumentiyada Dakhliga (faahfaahin dhowaan soo socota)

### Macluumaadka Muhiimka ah

Albaabada qoysaska gaar ah ayaa laga furi doonaa horaanta August si qoysasku ay u soo gudbiyaan codsiga dib-u-ansaxinta iyo inay soo dhigaan dukumentiyada loo baahan yahay.

### Waxaad U Baahan Tahay Inaad Ogaato Ku Saabsan Shuruudaha Warqadda Diidmada ee Working Connections (WCCC):

#### • Xaddidaada Dakhliga ee Working Connections:

- Dhamaan qoysaska la go'aamiyey inay yihiin ama ka hooseeyaan 60% dakhliga dhexe ee gobolka (SMI) waa inay soo gudbiyaan warqadda diidmada ee Working Connections Child Care (WCCC).
- Waxaan ku talinaynaa in qoysaska oo dhan oo qiyaasaya in dakhligaaga yahay 65% ama ka yar SMI, sida ku cad jadwalka hoose, sidoo kale ay soo gudbiyaan warqadda diidmada ee WCCC.
- Haddii dakhligaaga qoyska uu ka sarreeyo 65% dakhliga dhexe ee gobolka ee ku xusan jadwalka, laguma weydiin doono inaad soo gudbiso warqadda diidmada ee WCCC.

#### • Shuruudaha Warqadda Diidmada ee WCCC:

- Qoysaska waxay hadda codsan karaan WCCC si ay u helaan warqadda diidmada.
- Warqadda diidmada waa inay ka yar tahay 6 bilood waqtiga la soo gudbinta.
- Warqadda diidmada waa inay ku saleysnaataa dakhli ama la'aanta hawl la oggolaaday. Warqadda diidmada oo ku saleysan codsi aan dhammaystirneyn ee WCCC ma ku fiina.
- Qoysaska waxay dalban karaan ka-dhaafida warqadda diidmada ee WCCC haddii ay qabaan welwel amni.

### Habka Codsiga ee Working Connections (WCCC):

#### • Habka Codsiga:

- Waalidka waa inuu dhammeystiro habka codsiga iyo hubinta ee WCCC.
- Codso adiga oo la xiriiraya Xarunta Xiriirka ee Kaalmada Daryeelka Ilmaha 1-844-626-8687 ama onleenka [www.WashingtonConnection.org](http://www.WashingtonConnection.org).
- DCYF waxay dib u eegi doontaa macluumaadka si loo go'aamiyo xaq u yeelashada qoyska.
- Siin DCYF magaca iyo nambarka telefoonka ee bixiyaha daryeelka ilmaha.

#### • Su'aalo ku saabsan WCCC?

- Wixii su'aalo ah, wac Xarunta Xiriirka ee Daryeelka Ilmaha ee DCYF 1-844-626-8687.
- Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaq u yeelashada WCCC waxaa laga heli karaa onleenka [www.dcyf.wa.gov/services/earlylearning-childcare/getting-help/wccc](http://www.dcyf.wa.gov/services/earlylearning-childcare/getting-help/wccc).

### Ma U Baahan Tahay Gargaar?

Qoysaska waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay la xiriiraan Kooxda Helitaanka iyo Taageerada Qoyska (FAS) si ay u helaan taageero inta lagu jiro habka dib-u-ansaxinta oo dhan.

support@bskchildcare.org  
(206) 208 - 6865

### Macluumaadka Xaddidaada Dakhliga Guud ee WCCC:

Haddii dakhligaaga uu yahay ama ka hooseeyo xaddigaas, WAA INAAD soo gudbisaa warqadda diidmada ee Working Connections ama ka-dhaafid si aad u sii hesho kaalmada Best Starts.

Tirada Qoyska	- 60% SMI - Xaddiga Dakhliga Bilaha ah	- 65% SMI - Xaddiga Dakhliga Bilaha ah
2	\$4,094	\$4,435
3	\$5,057	\$5,478
4	\$6,020	\$6,522
5	\$6,984	\$7,566
6	\$7,947	\$8,609
7	\$8,128	\$8,805
8	\$8,308	\$9,001
9	\$8,489	\$9,196
10	\$8,669	\$9,392

### Sida Loo Gudbiyo Warqaddaada Diidmada ee WCCC:

#### Ikhtiyaarka 1: Fax Ugu Soo Dir Best Starts for Kids Subsidy

- Codso WCCC inay fax ku soo diraan warqadda diidmada.
- Nambarka fax: **(253) 295-2643**

#### Ikhtiyaarka 2: Soo hel Boostada iyo U Dir Navigator-ka FAS

- Codso WCCC inay warqadda diidmada kuu soo diraan boostada.
- Sawir ama nuqul iskaana ah ku soo dir fariin qoraal ama email u dir Navigator-kaaga FAS.

